

Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka- macluumaad mas' uuliyiinta loogu talagalay oo ku saabsan qabanqaabada waxbarasho-horaadka

Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka- macluumaad mas' uuliyiinta loogu talagalay oo ku saabsan qabanqaabada waxbarasho-horaadka

Waxaan doonaynaa in aan nololmaalmeedka dadka magaalada deggan ka dhigno sidi hore mid ka hufan. Waxaan fududaynaynaa oo hiigsiga qeyb ahaan kamid ah habsamisocodka codsiga booska waxbarasho-horaadka ee qoysaska deggan soonaha labo barbaarin-horaad xilli-waxqabadka 2020-2021.

Iyadoo lagu saleynayo cinwaanka gurigiina, wuxu qoyskiinu qeyb ka yahay tijaabadan, taas oo quseysa soonaha soo socda: Kulosaari Herttoniemi, Laajasalo, Kannelmäki, Malminkartano, Maununneva, Hakuninmaa, Kuninkaantammi, Maunula, Länsi-Pakila, Tuomarinkylä, Oulunkylä, Itä-Pakila

Booska waxbarasho-horaadka waxaa cunugga laga siinayaa xannaano-maalmeedka bixisa waxbarasho-horaadka ee ku taal deegaankiisa soonaha arday u qaadashada.

Booska waxbarasho-horaadka waxaa qoyska loogu soo jeedinayaa farriin qoraal ah 7.1.2020. Farriinta qoraalka ah waxaa loo dirayaa mas' uulka cunugga la deggan hal ciwaan. Fadlan hubi, inaad xannaano-maalmeedku heytsa lambarka telefoonka saxda ah ee lagu soo diri karo soo jeedinta booska waxbarasho-horaadka.

Sidan ayeey u shaqeysaa:

- 1) Waxaad heleysaa farriin qoraal ah, taas oo cunuggaada loogu soo jeedinayo booska waxbarasho-horaadka.
- 2) Soojeedinta waxaad ku aqbalaysaa ama ku diidsayaa qaab waafaqsan tilmaamaha ku qoran farriinta qoraalka ah.
- 3) Soo jeedinta waa la aqbalay: Wax walba waa cad yihiin! Go'aanka rasmiga ah waxaad heleysaa bisha Maarso.

Haddii aadan qaadan booska waxbarasho-horaadka ee cunugga loo soo jeediyay, booska waad iska dhiibtay waxaadna xannaano-maalmeed kale ka codsan kartaa boos waxbarasho-horaad. Waxbarasho-horaadka waxaa wakhtiga u dhexeeya 7.-23.1.2020 [laga codsanayaa arrimo fullinta elgtroonigga ah ee Helsinki](#). Markaas xittaa waxaa cunugga soonaha arday u qaadashada looga dammaanad-qaadayaa boos waxbarasho-horaad. U wareegista soona kale waa suurtagal, haddii ay halkaas ka bannaan yihiin boosas waxbarasho-horaad.

Haddii aysan codsashada elgtroonigga ah suurtagal aheyn, foom warqad ah ayaa lagu codsan karaa, foomkaas oo xannaano-maalmeedka loo soo celinayo. Waxbarasho-horaadka xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay toos ayaa xannaano-maalmeedka looga codsanayaa.

Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalintii inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Barbaarin-horaadku waxay u sii soconayaa qaab dhammaystir u ah waxbarasho-horaadka iyadoo waafaqsan baahida qoyska. Cunug kasta waa in uu ka qeybqaataa waxbarasho-horaadka sannad kahor inta ay uusan billaabn waajibka waxbarashadu. Mas' uuliyadda ka qeybqaadashada cunuggu waxay saaran tahay mas' uulka cunugga.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka Finnishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiya xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Ku socota ardayga dugsi-horaadka

Deyrta soo socota waxaa billaabnaya dugsi-horaad.

Dugsi-horaadka waxaad ciyaar ahaan, jimicsi, baaritaan iyo farshaxan ahaan ku baranaysaa wax cusub. Waxaad ku baranaysaa saaxiibo cusub waxaad ka uruursanaysaa buurosu buuxda oo waayo-aragnimo ah. Waxaadna sidoo kale inta sannadka lagu jiro soo qoraansan doontaa waxa ka dhacaya dugsigga.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwallada qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa bogagga shabakadda Helsinki hel.fi/preschool

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!

Helsinki

Education division
hel.fi/preschool

